# Guudmarka

Waxaa loo baahan yahay in si deg ah loo hagaajiyo xaaladaha hoyga qaxootiga. Wakhtiyada sugitaanka go'aamada ku saabsan codsiyada magangalyada ayaa sii kordhaya oo kala bar qaxootiga ayaa hadda ku nool hoy ku meel gaar ah oo aan lahayn xarumo ku habboon iyo fursado yar oo ay bulshada kaga qaybqaataan. Dad badan, waxay ku adkayd nolaanshaha ku dhowaad laba sano. Sharciga Kala-qeybinta hufnaanta leh wuxuu bixiyaa fursado lagu hagaajin karo xaaladdan. Sharcigan ayaa u oggolaanaya degmooyinka inay abaabulaan hoy qaab dhismeedka, halkaas oo qaxootiga ay ku heysanayaan nabad iyo go'aan qaadasho dheeraad ah oo ay si toos ah uga qayb qaadan karaan bulshada.

Si loo ogaado waxa loo baahan yahay, VluchtelingenWerk wuxuu sameeyay rai'yi uruurin ku saabsan waxa qaxootiga ay u arkaan inay muhiim u yihiin soo dhaweyn wanaagsan. Waxaan la hadalnay 92 qof oo qaxooti halkaas oo aan kula yeelanay wareysi koxeed iyo wareysiyo shaqskiyadeed oo fool-ka-foo ah waxaan sidoo kale jawaab ka helnay 696 qof oo qaxooti ah oo dheeraad ah rai'yi uruurin aan soo geliney interneetka.

Cilmi baaris ayaa muujineysa in asturnaanta iyo goobaha karinta gaarka loo leeyahay ay muhiim u yihiin hoyga wanaagsan, laakiin sidoo kale waa jawi ay qaxootigu dareemaan in la maqlo, la taageero iyo inay jogaan gurigooda. Goob nabadgeliyo leh ah oo islamarkaana ah goob siiso dadka qaxootiga ah fursado ay ku hormariyaan khibradahooda iyo ka qaybgalka bulshada. Tani waxay ku baaqeysaa qaab ka duwan soo dhaweynta, oo diiradda lagu saarayo qofka halkii ay ka ahaan lahayd habka magangalyada iyo si firfircoon ugu lug lahaanshaha bulshada laga bilaabo maalinta koobaad. Baahiyaha ugu muhiimsan ee la aqoonsaday waa:

1. **Qaxootigu waa inay awoodaan inay hoygooda ka dhigaan guri (ku meel gaar ah), halkaas oo ay goob aay ku nooladan naftooda oo aayna wax ku karsadaan**

Qaxootigu waxay xooga saarayaan muhiimadda ay leedahay meel aay ku dareemaan sida guriga, gaar ahaan hoyga muddada dheer. Waxay u baahan yihiin meel u gaar ah oo leh asturnaan ku filan si ay ugu nastaan. Qoysasku waxay sidoo kale xusaan muhiimada ay leedahay goobaha hurdada ee gaarka ah ee carruurta, halkaas oo ay dib ugu noqon karaan, tusaale ahaan si ay u qabtaan shaqada guriga, ama (ugu ciyaaraan) meelaha haweenka iyo carruurta. Inaad cunto karisid naftaada waa mid aad muhiim ugu ah. Tani waxay siineysaa qaxootiga inay xakameeyaan noloshooda iyo xorriyadda go 'aamiyaan goorta iyo waxa la cuno.

*'Halkan lix bilood ayaan ku noolaa. Muddo intee le 'eg ayaan halkan si joogidoonaa, ma garanayo. Waxaan u maleyneynaa in halkani tahay gurigeena, laakiin ma dareemeyso sidaas. Guriga, waxaad rabtaa meel badqab ah, inaad awood inaad naftaada cunto u sameyso oo aad ku mashquuliso iskuulka/dugsiga iyo shaqada. Sidas ayaad ku dareemi kartaa inaa guriga jogto (qaxootiga Yemen, Amsterdam)'*

2. **Meel joogto ah oo ku taal hoy u dhow xarumaha waa lagama maarmaan si qaxootiga ay u buuxiyaan maalmahooda si madaxbanaan oo ay ugu diyaar garoobaan mustaqbalkooda**

Wareejin badan inta lagu jiro xilliga soo dhaweynta ayaa ka dhigaysa mid adag in la dhiso xiriirada deegaanka iyo ka qaybgalka. Intaas waxaa sii dheer, guriyo badan ayaa ku yaal meelo fog, taas oo ka dhigaysa inay adag tahay in qaxootiga ay ku lug yeeshaan waxqabadyo ayna maamulaan arrimahooda. Fikrad ahaan, qaxootiga waa in si toos ah loogu soo dhaweeyaa (goobaha u dhow) degmada ay markii dambe ku hoyan doonaan, si ay horay ugu diyaar garoobaan mustaqbalkooda. *'Waxaan ku noolaa Amersfoort, markii aan u imid Leiden, qofna ma aqaanin. Hadda waa inaan si dhakhso leh u macsalamayaa qof kasta oo aan aqaan si aan markale uga bilaabo nolol Dordrecht (qaxootiga Suuriya, Leiden).'*

3. **Soo dhawaynta qoyska u dhow Nederland waxay siisaa qaxootiga dareen guri iyo badqab**

Qaxootigu waxay soo sheegaan in xubnaha qoyska ee hore ugu noola Nederland ay yihiin buundo muhiim u ah bulshada, gaar ahaan haddii aysan weli ku hadlin luqadda oo ay nugul yihiin dhibatooyin. Waqtigan xaadirka ah, tixgelin yar ayaa tan lagu bixiyaa meelaynta, taas oo keenaysa in qaxootiga mararka qaarkood ay joogaan hoy ka fog xubnaha qoyska aayna dareemaan kalinimo iyo go 'doon. *'Waxaan ahay hooyo aan la qabin. Kuma hadli kari Af-Hollandees, laakiin qoyskeyga ayaa iga caawin kara midan. Waxay iga dhigeysaa inaan dareemo badqab markan la joogo. Gaar ahaan walaalkay, maxaa yeelay wuxuu si fiican ugu hadli karaa Af-Hollandees. Waxaan weydiiyaa su 'aalo badan oo ku saabsan sida nidaamku u eg yahay halkan (qaxootiga Soomaaliyeed, Gilze).*

**4. Joogitaanka muddada dheer waa hubanti la 'aanta, inta badan walaac ku saabsan qoyska in dhulkan aan badqab ku dareemin, calaamadee khibradda qaxootiga ee hoyga.**

Sugitaanka muddada dheer ee hubanti la 'aanta ah ee ku saabsan natiijada nidaamka magangalyada iyo kordhinta aan la fileyn ee waqtiga kama dambaysta ah ee go' aanka ayaa keenaya walaaca iyo dareenka gargaar la 'aanta ee qaxootiga. Waxay sheegeen in marka ay sugayaan ay lumiyaan dhiirrigelintooda. Cadeyn la'aanta iyo garsoorka lo arko ee amarka ka baaraandegida codsiyada magangalyada ayaa ka dhigaya qaar dareemaya in la iloobe. In muddo dheer laga go 'doomiyo xubnaha qoyska, kuwaas oo inta badan weli ku nool dhul aan badqab ahayn, waxay xaaladda ka dhigeysaa mid aad u adag. *'Waxaan halkan ku sugeynay 18 bilood. Taasi waa mid aad u dheer waxayna u xun tahay caafimaadkaaga maskaxda. Qof kasta oo halkan jooga waa daalan yahay, waadna sheegi kartaa. Waan daalnay. Ma lihin hamigii aan la haysanay bilowgii. Waxaad isku daydaa inaad aad dhiranaato (Qaxootiga Turkiga, Amsterdam).*¶

**5. Qaxootigu waxay qiimeeyaan xiriirka shakhsi ahaaneed ee shaqaalaha. Waxaa jirta baahi loo qabo dhegeysi: - Qof ay u sheekagii karan sheekoadood xitaa hadii aan xal deg ah laga gaarin**

Meelaha qaarkood, inaad la hadasho la shaqaalaha waa mid ku adag qaxootiga waxay la kulmaan in xeerarka guriga si adag loo fuliyo, iyada oo aan loo eegin duruufaha shaqsiga ah. Qaxootiga waxay u baahan yihiin qof dhegaysto iyo shaqaale tixgeliya xaaladdooda shakhsi ahaaneed. *'Waxaan jeclaan lahaa in COA ay nala qaadato hindise dheeri ah. Maxay dadku ugu baahan yihiin azc-kan, sidee tahay? (Qaxootiga Suuriya, Harderwijk)'* Guryaha yaryar, waxaa jira xiriir shaqsiyadeed oo aad u dhow oo lala yeesho maareynta goobta, taas oo saameyn wanaagsan ku yeelata joogitaanka. Dadka ka soo jeeda kooxaha luqadaha yar ayaa mararka qaarkood dareemaya in la iska indhatiro marka la-talinta ay ugu horreyn u jeeddo aqlabiyadda. '*Maamulka maxalliga ah runtii waa noo wanaagsan yahay. Waxay isku dayaan inay na fahmaan: halka aan ka nimid iyo waxa aan la kulannay. Waxay muujiyaan naxariis waxayna isku dayaan inay na baraan waxyaabo ku saabsan nolosha halkan (qaxootiga Afgaanistaan, Goirle)'*

**6. Qaxootigu waxay rabaan inay si wanaagsan uga faa 'iideystaan waqtigooda soo dhaweynta waxayna rabaan inay kamid noqdan bulshada sida ugu dhakhsaha badan. Fasallada xirfadeed luqadda iyo ka caawinta helitaanka shaqada ayaa ugu muhiimsan**

Qaxootigu waxay u arkaan Af-Hollandeeska inuu lagama maarmaan uu u yahay kaqeybgalka bulshada si fudud, laakiin fasallada luqadda badanaa waxay ku xaddidan yihiin helitaanka waxaana jira liisaska sugitaanka oo dheer. Intaa waxaa dheer, qaxootigu waxay rabaan inay si dhakhso leh u shaqeeyaan laakiin waxay la kulmaan caqabado sida inaysan haysan lambarka BSN waana adag tahay in la helo shaqo u qalanto iyaga. Keliya boqolkiba 15% oo ka mid ah qaxootiga aya helaa shaqo u qalanto sida daraasaddan u sheegan. *'Shaqo la' aanta, noloshu waxaay noqonaysa wax la yaab leh. Waxaan jeclaan lahaa inaan dareemo caadi ah, keliya waxan ahay bini'aadam. Taasi waa shaqada dareenka leh ee i siisaa (qaxootiga rer Iran, Harderwijk)'*

**7. Xaaladda qaxootiga da 'da yar ee hadda jirsaday 18 sano waxay u baahan tahay feejignaan dheerad ah.**

Carruurta da 'doodu ka weyn tahay 18 sano waxaa ku dhacdaa inta u dhaxaysa jajabyada daryeelka: mar dambe xaq uma laha waxbarashada iyo waxqabadka carruurta, laakiin weli waa carruur waxayna rabaan inay horumariyaan. Fursadaha waxbarashada dheeraadka ah weli lama heli karo. *'Maalintii oo dhan ayuu halkaas fadhiistay keligis. Isaga ma samayni karo loomana oggola inuu wax sameeyo. 22-sano jir ayaa doonaya inuu helo shaqo lana garab-istaago. Maamulka goobta waa in aay ka dhigaan dhalinyaradan tamarta leh kuwa shaqeeyaan (qaxootiga Suuriya, Gilze).*¶